

Xaaladaha iyo Ka hortaga Khatarta Isticmaalka Xad dhaafka ah

Mukhaadaraadka obiyoodh waxaa kamid ah mukhaaraadka culus ee fentanyl iyo heroin iyo sidoo kale dawooyinka ay qoraan dhakhaatiirtu ee lagu daweyyo xanuunnada sida morphine, codeine, methadone, oxycodone (Oxycontin, Percoden, Percocet), hydrocodone (Vicodin, Lortab, Norco), fentanyl (Duragesic, Fentora), hydromorphone (Dilaudid, Exalgo), iyo buprenorphine (Subutex, Suboxone). Kuwa soo socdaa waxay leeyahiin xaaladaha khatarta qaar ee isticmaalka xad dhaafka ah ee obiyoodhka iyo sidoo kale xeeladaha ka hortaga:

Iskudaridda Mukhaadaraadka

Isticmaalka xad dhaafka ah waxa uu dhacaan marka ay dadku isku daraan daawooyinka oobiyyodhka iyo khamri iyo/ama benzodiazepines. Khamriga iyo benzodiazepines-ka (Xanax, Klonopin, Ativan iyo Valium) waxaa si gaar ah u khatar ah maadaama, sida obiyoodhka oo kale ay waxyaabahani saameeyaan awoodda qofka ee neefsiga. Iska ilaali in obiyoodhka lagu daro mukhaadaraadka kale ama khamriga. Hadii uu dhakhtar kuu soo qoray obiyoodh iyo benzodiazepine, waxa aad u qaadataa sida laguugu qoray.

U adkaysiga

U adkaysigu waa awoodda uu jidhkaagu ku maarayn karo awoodda mukhaadaraadka. U adkaysigu wuu is badalaa mudo kadib, markaa waxaad u baahan kartaa mukhaadaraad dheeraad ah si aad u dareento saameynta deroogada. U adkaysigu waxa uu hoos u dhacaan marka uu qofku mudo uu joojiyo isticmaalka oobiyyodhka. Marka uu qofku uusan lahayn u adkaysigii hore oo uu mar kale qaato oobiyyodhka, waxaa ay khatar ugu jiraan tandhaafid, xataa hadii uu qofku qaato xaddi aan markii hore waxba yeeli jirin. Hadii aad isticmaasho oobiyyodh, mudo marka aad joojisay, waxa aad ka bilawdaa qiyaas hoose.

Caafimaadka Jidhka

Caafimaadka jidhkaagu waxa uu saameeyaa awoodda jidhkaagu uu ku maareynayo oobiyyodhka. Maadaama uu oobiyyodhku saameeyo awooddaada neefsiga, hadii aad qabto neef ama mushkilad kale oo neefsi ah waxa aad khatar ugu jirtaa tandhaafid. Shakhxiyadka qaba xanuunnada beerka (cagaarshowga), kalyaha, iyo dadka qaba HIV ayaa sidoo kale khatar badan ugu jira inay tandhaafida saameyso.

Isticmaalka Xad dhaafka ah ee Hore

Qofka ay hore ugu dhacday tandhaafid aan nafta khatar ku ahayn wuxuu ku sugar yahay khatar badan oo ku aadan saamaynta isticmaalka xad dhaafka ah ee mustaqbalka. Si aad uga hortagto tandhaafid khatar ah, waxa aad bartaa qoyskaaga iyo saaxibadaada sida ay ku garan lahaayeen oo ay uga hortaggi lahaayeen tandhaafida xad dhaafka ah.

Sideen ku garanayaa hadii uu qof samayeey tandhaaf ku aadan isticmaalka?

Hadii uu qof qaato oobiyyodh ka badan inta jidhkiisu qaadi karo, wuu suuxi karaa, waxa uu joojinayaa neefsiga oo wuu dhiman karaa. Tandhaafidda oobiyyodhku waxay ku timaadaa daqiiqado ama saacado.

Qofka ay ku dhacdo tandhaafiddu waxa uu muujin karaa astaamaha soo socda:


- Neefsi yar (wax ka badan 1 neefsi 5tii ilbidhiqsiba) ama aan neefsanaynin.
- Matag.
- Wajiga oo cadaada oo dhidida.
- Bishimaha, cidiyaha faraha ama suulasha oo buluug noqda.
- Garaaca wadnaha oo yaraada, aan caadi ahayn, ama aan garaacayniba.
- Cod khuuro ama dhawaaq inta uu qofku hurdo ama marka uu iska jiifo.
- Qofka oo aan hadlin marka lagu qayliyo magaciisa ama marka faraha looga xoqo xabadka aan jawaabaynin.

**Tandhaafiddu waa XAALAD
CAAFIMAAD OO DEGDEG AH!
Wac 9-1-1 isla markaaba**



www.pharmacy.ohio.gov

Tilmaamaha Lagu Garto iyo Ka Jawaabida Isticmaalka Xad dhaafka ah



**TILMAAMAH
BUKAANNADA IYO
DARYEEL-BIXIYAYAASHA
Guddiga Farmashiyaha
Ohio (Ohio Board of
Pharmacy)**

Steven W. Schierholt
Agaasimaha Fulinta

Waa maxay naloxone?

Naloxone (Narcan) waa daawo dhakhtarku qoro taasoo baabi'in karta cilladda isticmaalka xad dhaafka ah ee daawada opioid ka. Marka qofku isticmaalaayo xiliga uu iska badiyo daawada, naloxone ayaa xanibaysa saamaynada opioid ku leedahay maskaxda waxayna soo celinaysaa neefsiga qofka. Waxaa cirbad ahaan looga qaadan karaa muruqa ama waxaa lagu buufin karaa sanka.

Naloxone malahan cillad haddii la iska badiyo. Haddii la siiyo qof aan iska badin opioid, malahan wax dhibaato ah. Haddii Naloxone la siiyo qof iska badiyey opioid, waxay ku keeni doontaa astaamaha dhakhso u joojinta. Naloxone ma bi'iso cilladaha iska badinta daawada ee ay keento daawo aan ahayn opioid.

MUHIIM: Naloxone waa in lagu kaydiyaa meel leh heerkulka caadiga ah ee qolka lagana fogeeyaa iftiinka. Naloxone ayaa baraf noqon karta marka la dhigo heerkul qabow. Haddii sidaan dhacdo, daawada ayaa laga yaabaa inaysan u shaqayn sidii la rabay.

Messha aad ka Helayso Caawimaad



988 ayaa bixisaa adeegyo taageereed oo wax dhaleecayn ah lahayn kaas oo ah 24/7 oo loogu talagalay adeegyada caafimaadka maskaxda, isticmaalka maandooriyaha, iyo wax kaloo badan. Qoraal u qor, ka wac, ama kala sheekayso 988.

Naloxone Bilaash ku hel Boostada
www.naloxone.ohio.gov

RecoveryOhio - How to Get Help
www.pharmacy.ohio.gov/GetHelp

Hagaha Ku Xad-gudubka Mukhaadaraadka & Goobta Daawaynta Adeegyada Caafimaadka Maskaxda
<https://findtreatment.gov/>

Sida looga jawaabo iska badinta isticmaalka xad dhaafka ah ee daawada ama mukhadaardka

1. Iskuday inaad qofka kiciso adoo ku qaylinaaya magaciisa faraha neh ku riixaya xabadkiisa (sternum rub).
2. Wac 9-1-1. Waxa aad u sheegtaa in qofku aanu neefsanaynin ama ay neeftu ku adag tahay.
3. Waxa aad xaqiijisaa in qofka aysan afka wax neeftha ku xiri kara aysan afka uga jirin. Haddii neefsigu joogsado ama hoos u dhaco, sii neef badbaadin.

4. Sii samatabbixinta Neefsashada

Talaabada 1: Madaxiis hoos u dhig, oo kor u qaad qaypta karkiisa, qabo sankiisa.

Talaabada 2: Sii 1 neef yar oo tartiib ah 5 ilbiriqsi mar. Ku afuu hawo ku filan sanbaboo yinkiisa si xabadkiisu kor ugu kaco.

5. Iisticmaal naloxone siina wad neefsiiinta qofkahal mar 5 tii ilbidhiqsiba.

6. Haddii qofku bilaabo inuu iskiis **u** neefsado, gees u seexi si aad uga difaacdoo inuuusan margan haduu matago. Sii wad inaad isha ku hayso neeftiisa aadna samayso neef badbaadin ah haddii neefsigiisu ka hoos maro 10 neefsi daqiqadiiba. Hadii uu matago qofka, waxa aad ka masaxdaa afka iyo sanka.

7. Haddii aan qofku uusan wax jawaabin celin ah muujin marka aad kiciso, taabato ama u dhawaqdo, ama uu bilaabi waayo inuu iskii u neefsado 2-3 daqiqiyo gudahood, qiyas kale oo naloxone waa in la siiyaa.


8. La joog qofka ilaa gurmadka degdega ah ee EMS kaaga yimaado.

*Fadlan ogoow in ay jiraan qaabab kale oo loo isticmaalo naloxone. Sharciga Ohio ayaa qasab ka dhigaaya in bukaanka la baro habka isticmaalka naloxone loo isticmaalaayo. Farmashiileyaashu waa inay agabka tababarka siyaan dadka haddii habka isticmaalka naloxone uusan ku qornayn buuga yogta.

Sida loo isticmaalo naloxone*:

Daawada Sanka lagu buufiyo ee NARCAN™ (4MG) iyo Kloxxado™ (8MG)

1. Ka fiiq sajalka si aad u furto daawada sanka lagu buufiyo.
2. Ku qabo aalada adoo suulka kaga qabanaaya salka dhalada ka dibna fartaada hore iyo faraha dhexe ku qabanaaya midkood labada gees ee dhalada. Ha saarin wax cadaadis ah ilaa inaad diyaar u tahay maahee buufinta qiyasta.



3. Waxa aad qofka u dhigtaa qadaadka gacantaadana saar hosta madaxa qofka si aad taageero u siiso. Si tartiib ah u geli caarada daawada mid kamid ah duleelada sanka ilaa farahaaga saaran labada dhinaca ee afka daawadu midkood ay ka soo hor jeedaan salka sanka qofka.

4. Waxa aad aayar u tuujisaa meesha cas si aad dawada u siiso. Ka saar aalada duleelka sanka kadib marka aad buufiso kuuradii la rabay.

5. Haddii uusan qofku muujin wax jawaab celi ah kadib 2 ilaa 3 daqiqiyo, sii qiyas dheeraad ah oo aad ka siinayso duleelka kale ee sanka ee.

Si aad u hesho nuqul ka mid ah tilmaamaha warshada booqo: www.pharmacy.ohio.gov/NARnasal (NARCAN) www.pharmacy.ohio.gov/KLOnasal (Kloxxado)

Cirbada ZIMHI™ (Naloxone HCI)

1. Ku riix cirbada bawdada kadib marka aad daboolka ka qaaday cirbada.

2. Riix balaagarka ilaa ay dhag tiraahdo ka dibna xaji 2 ilbiriqsi ka dib intaadan ka bixin cirbada. Kuurada saxda ah ayaad qaadatay haddii balaagarka daawada lagu riixay dhammaanteed ayna meesha daawadu faaruq noqoto. Waa wax caadi ah inta badan daawada inay ku harto saliingaha kadib marka kuurada qofka lagu duro.

3. Hoos u riix badhanka badqabka adoo isticmaalaya hal gacan iyadoo faruhuna ka dambeeyaan cirbadda. Sidaan si sax u samee isla marka aad daawada ku durty.

4. Saar saliingaha la isticmaalay boqshada buluuga ah kadibna xir. Haddii uusan qofka uu muujin jawaab celin kadib 2 ilaa 3 daqiqiyo, sii qiyas kale adoo adeegsanaaya aalad cusub.

Si aad u hesho nuqulka tilmaamaha shirkada daawada samaysay booqo: www.pharmacy.ohio.gov/ZIMinject